

لا إله إلا الله



القيادة العسكرية

ARMED FORCES COMMAND
TALISKA CIIDANKA

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ
لِلنَّشْرِ الْعَاجِلِ

FOR IMMEDIATE RELEASE



حركة الشباب المجاهدين

HARAKAT AL-SHABAAB AL MUJAHIDEEN
XARAKADA MUJAAHIDIINTA AL-SHABAAB

“Hawlgallo lagu naafeeyay cadawga”

18 Ramadaan 1446 H (18 Maarso 2025)

Ciidamada Mujaahidiintu waxay maanta oo Talaado ah weerar cagmarin ah ku qaadeen saldhig ay cadawga murtadiinta ah ku lahaayeen deegaanka "Warta Dibi Samatar", duleedka magaalada Masaajid Cali Gaduud ee Wilaayada Islaamiga Shabeellada dhexe. Murtadiinta halkaas lagu weeraray ayaa ahaa calooshood u shaqaysatayaasha loogu yeero Gorgor ee ay maamusho xukuumadda Turkida.

Dagaal kadib, Mujaahidiintu waxay - Allaah fadligiis – cagta mariyeen saldhiggii murtadiinta, waxaana halkaas cadawga ashahaado la dirirka ah looga dilay in ka badan 30 murtad, waxaana laga ghaniimaystay hub u badan qoryaha AK-47 iyo PKM. Sidoo kale waxaa la qabtay maxaabiis ka mid ah murtadiintii la weeraray, kuwaas oo hadda ku jira gacanta Mujaahidiinta.

Isla Wilaayada Islaamiga ah ee Shabeellada dhexe, ciidamada Mujaahidiintu waxay kamiin u dhigeen ciidamo murtadiin ah oo hawlo ashahaado la dirirnimo ah ka sameynayay deegaanka "Hareeri-Cadle" ee u dhexeeya magaalooyinka Balcad iyo Muqdisho. Khasaaraha cadawga la gaarsiiyay waa dhimashada 6 askari oo murtadiin ah iyo 12 kale oo dhaawac ah. Waxay Mujaahidiintu kamiinkaas cadawga uga qaniimaysteen 2 qori oo PKM ah, qori RPG ah iyo dhawr qori oo AK-47 ah.

Sidoo kale, dagaal lagu jabiyey maleeshiyaatka ridada ayaa maanta ka dhacay deegaanka "Nuur-Gaab" ee duleedka degmada Cadale, Wilaayada Islaamiga ah ee Shabeellada dhexe, waxaana halkaas lagu dilay 5 askari oo murtadiin ah kuwaas oo uu cadawgu meydadkooda uga cararay goobtii dagaalka.

Dhanka magaalada Muqdisho, ciidamada Mujaahidiintu waxay barqanimadii maanta hawlgal gaar ah ku beegsadeen madaxa kooxda ridada, Xassan Sheekh Maxamuud. Mujaahidiintu waxay si gaar ah u bartilmaameedsadeen kolonyo gaadiid ah oo uu la socday Xassan Gurguurte xilli ay ka soo baxayeen madaxtooyada, kuna wajahnaayeen garoonka diyaaradaha. Khasaare dhimasho iyo dhaawac ah ayaa soo gaaray saraakiishii iyo askartii ilaalada u ahayd Xassan Gurguure, waxaana burburiyay qaar kamid ah gaadiidkii kolonyada. Hawlgalkan iyo kuwo kale oo ka horeeyay waxay cadayn u yihiin in aysan jirin goob ay ku badbaadi karaan madaxda iyo saraakiisha cadawga ku ah shareecada Islaamka, iyo in gacanta Mujaahidiintu ay gaari karto goob walba oo uu cadawgu gabbaad ka dhigto si kasta oo uu dhagaxaan iyo ciidamo iskugu wareejiyo.

Taliska ciidamada Mujaahidiintu wuxuu u mahad celinayaa Allaah – Subxaanahu Watacalaa- kaidbna wuxuu bogaadinayaa hawgallada ay geesiyada Tawxiidku ka wadaan goobaha ay cadawgu kaga suganyihiin Wilaayaatka dalka, gaar ahaan caasimadda Muqdisho, Shabeellada dhexe, Shabeellada

hoose iyo Hiiraan, kuwaas oo lagu xoreeyay degmooyin iyo deegaanno ay cadawgu xoog ku haysteen, dibna loogu soo celiyay xukunka Shareecada Islaamka.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay u dagaallameysaa dhawritaanka badqabka Ummadda Muslimka ah, hirgelinta Shareecada Islaamka iyo inay dhammaan dhulalka Muslimiinta ka xoreyso gaalada iyo murtadiinta dabadhilifka u ah. Mar kale waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ku celinaysaa dalabkii ahaa in dadka Muslimiinta ah ay ka fogaadaan saldhigyada, xarumaha iyo xafiisyada cadawgu ku leeyihiin degmooyinka iyo deegaanada ay xoogga uga haystaan ummada Soomaaliyeed ee Muslimka ah.

Waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ballan ku qaaddeysaa inay sii wadi doonto Jihaadka ka dhanka ah isbahaysiga caalamiga ah ee saliibiyiinta iyo dabadhilifyadooda murtadiinta ah, illaa ay geyiga Soomaaliyeed ka saareyso cadowga hororka ah ee ku soo duuley, iyo illaa diinta dhammaanteed ay Allaah keliya u sugnaaneyso. Allaah, subxaanahu watacaalaa, wuxuu yiri

وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّى لَا تَكُونَ فِتْنَةً وَيَكُونَ الدِّينُ لِلَّهِ فَإِنْ انْتَهَوْا فَلَا عُدْوَانَ إِلَّا عَلَى الظَّالِمِينَ [البقرة: 193]



﴿ وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾

“But honour belongs to Allah and His Messenger, and to the Believers; but the Hypocrites know not”